Waxbarashada huteelada iyo makhaayadaha.

Madoonaysaa in aad kashaqeysid shaqooyin adeega bulshada ah?
Madoonaysaa in aad lahaatid shirkad aad adigu leedahay mustaqbalka?
Madoonaysaa in aad shaqo toos ah doonatid kadib marka aad dhameysid waxbarashada dugsiga sare?
Madoonaysaa in aad wax barasho dibada aad u tagtid?
Madoonaysaa in aad la shaqeysid dad xirfadaada oo kale haysta?
Haddaba waxbarashadan huteealada iyo makhaayadaha waa mid adiga si gaar ah kugu haboon.

Waxbarashada hoteellada iyo makhaayadaha waxa aad barandoontaa aqoonbuuxda oo ku saabsan habka shaqooyinka loofuliyo,habka adeega bulshada,masuulna loonoqdo,iyo dhaqaalaha.
Aqoontaas iyo cilmigaas oo aad u isticmaali doontid marka aad istiraahdid shirkad furo,ama aad ka shaqeysid adeega bulshada,ee aad adigu gaar ahaan xiiseyneysid.Waxyaalo badana waxaaad u yeelan doontaa fiirogaar ah.Tusaale ahaan sida cuntada dabiiciga ah,iyo ku alaabsi dadaal horumareed oo aad u sareeya.Waxaad kaloo aad barandoontaa sida dadka loola shaqeeyo.

Shaqooyinka hoteelada iyo makhaayaduhu waa caalami, islamarkaana ku xidhan isfahan iyo adigoo yaqaana luqado kale,islamarkaana u haya xiiso dadkakale iyo dhaqamadooda.
Waxaa intaas soo raaca in aad helikartid fursad ah in aad shaqeysid ama aad waxbarasho aad utagtid dibada, kadib marka aad waxbarashadan huteelada iyo makhaayadaha aad ka qalin jebisid.

In aad shaqeysid ama waxbarashadaada wadatid.

Haddii aad dooratid waxbarashadan huteelada iyo makhaayadaha, shaqotoos ah aayaad raad sankartaa kadib marka dugsiga sare aad dhameysid.Shaqooyinka aad raad sankartid waxa ay ku xidhantahay hadba wax aad baratay,islamarkaana kuu ah takhasus, markii aad ku jirtay waxbarashada dugsigasare.Haddii aad dooneysidna waad siiwadan kareysaa waxbarashadaada kadib marka aad dhameysatid waxbarashadaada dugsiga sare.Waxaanad wax ka barankartaa sida dugsiyada lagubarto xirfadaha ama jaamacadaha.Hadii aad istiraahdid wax kabaro jaamacadaha waxaad noqonkartaa tusaale ahaan sida dhakhtarka raashinka talo kabixiya ama kasiiya dadka.
Waxaa intaas dheer oo aad weydiinkareysaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)wax barashooyinka dugsiga sare ee aad u baahantahay si markaa aad ugu geshid, una siiwadatid waxbarashooyinka kale ee aad xiiseyneysid.

Waxbarashadani waxa ay ka koobantahay

Waxabarashadan huteelada iyo makhaayadahu wax ay ka koobantahay casharo,casharada qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganaysa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo u gaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada hoteelada iyo makhaayadaha oo kaliya.Waxaa intaas sooraaca in ay jiraan casharo kale oo aad adigu gaar aad u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay 2 takhasusood.Taas oo macnaheedu uu yahay ardayda dhamaan dhigata waxbarashadan hoteelada iyo makhaayadaha ee kuna sugan dalkan iyo nawaaxigiisa waxa ay doorankaraan marba kii ay rabaan in ay ku takhasusaan.Waxaa laga yaabaa meelo qaarkood in ay jiraan takhasusooyin farabadan oo kala duwan. Kuwaas oo laga yaabo in ay adiga gaar ahaan kugu haboonyihiin.Waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)

Takhasuska guud waxaa ka mid ah.

- Hoteelada- Shaqadani waa hadii aad xiiseyneysid in aad ka shaqeysidhoteelada,meelaha lagu qabto shirarka,halkaas oo aad kaga shaqeyn doontid sida, adeega iyo soodhaweynta dadka, iyo waxyaale kale oo dadka xiisogeliya.
- Makhaayadaha –iyo cunto bixinta- Waxa ay tahay haddii aad dooneysid in aad ku shaqeysid sida cunta sameeynta ama qeybiya dalabyada cuntada iyo adeegyada.

Xidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashadan huteelada iyo makhaayadaha waxa aad xidhiidh la lahaan doontaa suuqa shaqada,Waxaad kaloo aad heysataa ugu yaraan ilaa iyo 15 isbuuc oo dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Tababarkaana waxaa kuu diri doona iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeyso iskuulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhaw meesha aad degen tahay.Meesha aad tababarka aad kasameendoontid waxa ay ku xidhantahay hadba takhasuskaagu waxa uu yahay.Waana habka ugu wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiina aad ku yeelan kartid.xidhiidhkaas oo aad markale aad kaga faa ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.Haddii aad dooneysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada meel aan aheen Swiidhen,way surtogal noqon kartaa.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Waxaad heysataa fursad balaadhan oo aad shaqo ku heli kartid,marka aad ka baxdid waxbarashada dugsigasare ee ah huteelada iyo makhaayadaha,laakinse waxa ay ku xidhantahay hadba waxa aad baratay ama takhasuskaaga uu yahay.Haddii aad tababaro xirfadeed iyo aqoonkorosi aad sameysidna waxa markaa sii fiicnaanaya fursadaha aad shaqooyin ku helikareysid.Meelaha ugu fursadaha wanaagsan ee aad shaqooyin ka heli kareysid waxaa kamid ah sida,magalooyinka waa-weyn,iyo goobaha ay dadka dalxiislayaashu yimaadaan.
Inta shaqooyin ee banaan ,waxa ay ku xidhantahay hadba waxkhtiga lagujiro sida uu yahay suuqa shaqadu ee sanadkaas..
Wakhtiyada ugu badan ee shaqooyinka lahelikaro waxaa kamid ah sida, sanadka wakhtiyadiisa kuleelaha ah,maalmaha fasaxyada ah ee waa-weyn,iyo wakhtiyada ay iskuuladu ay xidhanyihiin ee ardaydu ay fasax ay kujiraan.